

Gobolku waxa uu helay sahay badan oo daawooyinka xanuun baabi'iyaha ah

Diiseembar 06, 2022 [Shir jaraa'id](#)

Si looga hortago yaraanta daawooyinka xummadda iyo xanuunka, gobolku waxa uu helay shan milyan oo qasac oo ah daawooyinka acetaminophen iyo ibuprofen ee caruurta oo loogu talo galay qoysaska Alberta.

Muddo laba bilood ah, waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha kunool Canada waxaa ka kala go'naa daawooyinka xummada iyo xanuunka ee caruurta. Kala go'naanshiyahani waxa uu culays dheeri ah saarayay qoysaska iyo nidaamka caafimaad waayo dad reer Alberta ah oo badani waxay booqanayaan farmashiiyada, dhakhaatiirta iyo isbitaalada. Si loo xaqijiyo in daawooyinka xummada iyo xanuunku ay markasta yihiin kuwo laga heli karo gobolka oo dhan culayskana looga dul qaado qoysaska iyo caruurta, dawlada Alberta iyo Adeegga Caafimaadka ee Alberta waxay soo heleen sahay dhan shan milyan oo qasac oo ah daawooyinka acetaminophen iyo ibuprofen oo ay ka heleen Atabay Pharmacueticals iyo Fine Chemicals.

Dawlada Alberta iyo Adeegga Caafimaad ee Alberta waxay la shaqaynayaan Health Canada si loo dhammaystiro habraaca ansixinta shatiga samaynta daawooyinka. Marka ansixinta la meel mariyo, daawada waxaa loo soo qaadi doonaa Alberta iyadoo 10 diyaaradood oo xammuul ah ay keeni doonaan. Marka ay soo gaadhaan daawooyinku gobolka, waxaa loo qaybin doonaa bulshada iyo farmashiiyada tafaariiqda iibisa si markaasi qoysaska iyo daryeel bixiyayaashu ay ugu iibin karaan caruurtooda. Maadaama dawlada Alberta ay soo heshay daawooyin badan oo ah kuwa xummada iyo xanuunka, waxaa la filayaa in dadka reer Alberta ay uga heli doonaa farmashiiyada daawooyinkan sidi ay berigii hore uga heli jireen

farmashiiyada. Si kastaba ha ahaatee, farmashiiyadu waxay awood uyeelan doonaan inay shaqaalaha farmashiiyadu iibyaan haddii ay warwar ka qabaan daawooyinka yaalla farmashiigooda.

Atabay Pharmaceuticals and Fine Chemicals waxay ka haysataa ansixin Health Canada walxaha samaynta daawada hadda wakhti xaadirkana waxay udirtaa in la mida daawooyinka ay hadda Alberta isku dayayso inay ka hesho dawladaha kale sida Maraykanka iyo Ingiriiska.

Xaqaa'iqda

- Daawooyinka waxaa lagu samayn doonaa xarun caafimaad oo dibadda dalka ku taal taasoo ay ansixisay Health Canada.
- Kartoomaynta marka la samaynayo waxaa la raaci doonaa hagayaasha Health Canada.
- Qiimaha tafaariiqdu ee uu macmiilku ku iibsanayaa waxay la mid noqon doonaa celceliska qiimaha daawada noocan ah.
- Daawooyinka ay soo dajisato Canada waa inay buuxiyaan shuruudaha ammaanka, tayada, iyo waxtarka ee ay dajisay Health Canada si markaasi loo oggalaado soo dajintooda.